



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Sibtambar 1, 2021-ka

Ku socota: Hay'adaha Maamulka Kiiska iyo Shaqaalaha Daryeelka Shakhsiyeed ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Shuruudaha Sharciga Senate-ka 1534 iyo taxanaha warbaahinta cusub ee dhanka maqalka

Sharciga Senate-ka 1534 ayaa u baahan tababar loogu talagalay shaqaalaha daryeelka guriga iyo taageerada shakhsiyeed iyo shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed laga bilaabo Sibtambar 1, 2021-ka. Iyada oo qayb ka ah shuruudahan, shaqaalaha cusubi waa in ay ku gudbaan qiimeyn.

Shuruudaha ayaa dejiyay nidaamyo la raacayo oo loogu talagalay shaqaalaha daryeelka guriga iyo taageerada shakhsiyeed iyo shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed si loo xaqiijiyo in ay leeyihiin xirfadaha, aqoonta iyo kartida ay ku bixiyaan adeegyo iyo taageerooyin tayo leh oo la siinayo dadka helaya adeegyada iyaga oo isticmaalaya Medicaid.

Tababarku wuxuu shaqaalaha ka caawiyaa bixinta bixiyaan adeegyo tayo leh, ku sii nagaadaan xirfadahooda, wuxuu horseedaa ku qanacsanaanta shaqada, wuxuuna wanaajiyaa ammaanka.

Laga bilaabo Sibtambar 1, 2021-ka, shaqaalaha cusub waxaa looga baahnaan in ay qaataan tababarada taxanaha ah ee shaqaalaha cusub. Tani waxaa ka mid ah jihayn 'orientation' ka hor inta aysan ku soo biirin xooga shaqaalaha iyo tababarka muhiimka ah 120 maalmood gudahood ka dib ku soo biirida xooga shaqaalaha. Shaqaalaha hadda jiraa waxay u

baahan yihiin in ay dhammeystiraan dib u eegista taxanaha tababar muddo aan ka dambeyn Maarso 31-keeda, 2022.

Tababarku waa mid lacag la'aan ah waana isku darka koorsooyinka tababarka dhanka internet-ka iyo aqoon isweydaarsiyo muuqaal/maqal ah iyo mid shaqsi ah. [Tababarka ee Carewell SEIU 503](#) ayaa bixiya tababarada.

OHCC ayaa haysa ilo qiimo leh si shaqaalaha looga caawiyo in ay ogaadaan waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan shuruudahani.

- Taxanaha warbaahinta cusub ee dhanka maqalka waxaa loo yaqaan [OHCC Connections waxaana ka mid ah shan qaybood oo gaaban oo ka hadlaya waxa shaqaaluhu u baahan yihiin in ay ogaadaan iyo jawaabaha ku aadan su'aalaha caamka ah.](#) Qoraalada ayaa la helayaa iyaga oo ku qoran Ingiriisi, Arabic, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish, iyo Vietnamese.

Si aad u dhageysato warbaahinta dhanka maqalka oo iskugu diiwaan geliso, fadlan raac meeshan la sii gelayo: [socohttps://blubrry.com/ohcc_podcast/](https://blubrry.com/ohcc_podcast/)

- [Website-ka OHCC](#), waxaa sidoo kale jira dokumentiyada Su'aalaha Inta badan La isweydiyo, warqado macluumaad wata 'flyers', wax ku soo bandhigida nidaamka Powerpoint iyo waqtiga la qabtay ee tababarka loo baahan yahay. Dokumentiga Su'aalaha Inta badan La isweydiyo ee loogu talagalay [PSWs](#) iyo kuwo loogu talagalay [dadka ka tirsan adeegyada](#) ayaa la helayaa.

Shaqaalaha taageerada shakhsiyeed waxay dadka naafada ah ka caawiyaan in ay si badbaado iyo madax bannaani leh ugu noolaadaan guryahooda iyo bulshooyinkooda dhexdiisa. Tababarkani wuxuu xaqiijinayaa fayyo-qabka, tayada nololeed, iyo badbaadada dadka hela adeegyada iyo taageerooyinka. Wuxuu sidoo kale xaqiijinayaa in shaqaaluhu haystaan waxyaabaha ay u baahan yihiin iyo ilaha si ay shaqadooda ugu qabsadaan si wax ku ool ah.

Waad mahadsan tahay taageeridaada iyo u adeegidaada dadka reer Oregon ee qaba naafanimada maskaxda ama korriinka.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.